

Ilmahaaga wuxuu u diyaar garoobayaa in uu bilaabo dugsiga xanaanada (Kindergarten). Waxaa lagaaga baahanyahay in aad qaadid talaabooyinka soo socda inta uusan ilmahaaga bilaabin dugsiga xanaanada.

Tilaabooyinka Xanaanada

♥ Laga bilaabo bisha Maarso waa in aad ilmahaaga balan uga sameysaa dhaqtarka si uu baaritaan caafimaad oo jirka ugu sameeyo.

♥ Inta badan ilmaha bilaabaya dugsiga xanaanada waxay u baahanyihiin tallaalo badan. Sidaas darteed waa in aad kaarka tallaalada ilmahaaga geysaa balantiisa caafimaadka jirka.

♥ Waxaad kaheli kartaa xarunta Community Action Partnership of Mid Nebraska tallaalo qiimo jaban. Waxaa Lexington ka jira xarumo tallaalo oo loogu talagalay dadweynaha waxayna shaqayaan maalmaha isniinta 1-da iyo 3-da bil kasta. Waxaad ka wacdaa 308-324-5733 ama 308325-3169 si aad balan uga sameysatid.

♥ Ballan uga samee ilmahaaga dhaqtarka indhaha hadii aanan wali lagu samaynin baaritaanka indhaha markii uu marayay baaritaanka caafimaadka jirka.

♥ Sharciga gobolka Nebraska ayaa na farayaa inaan qaadno tilaabooyinkan xiliga diiwaangalinta dugsiyada shacabka.



Hadii aad rabin baaritaanka caafimaadka jirka ama kan indhaha, waa in aad iskuulka u soo gud-bisaa warqad diidmo oo saxiixan oo taariikh leh. Dugsiyada shacabka Lexington waxa ay ku dhiiragalinayaan dhamaan waalidiinta in ay raacaan talaabooyinka kor ku xusan waxa ayna dani ugu jirtaa waxbarashada carugaaga.

Waxaad ka heli kartaa Lexington wax yaabaha soo socda ama waxaad dooran kartaa dhaqtarka aad dooneysid, balse waa in aad keentaa koobiga kaarka caafimaadka.

CAAFIMAADKA:

Plum Creek Medical Group
1103 Buffalo Bend.
Lexington, NE 68850
(308) 324-6386.

LRHC Family medicine
1105 North Erie
Lexington, NE 68850
(308)324-8308

INDHAHA:

Family Eyewear
111 East 8th St
Lexington, NE 68850

Walmart Vision Center
200 Frontier Road
Lexington, NE 68850

